



NORTH DAKOTA
DEPARTMENT of HEALTH

Ka-takhalusidda Qashinka Guriga ee Khatarta Leh iyo Alaabooyinka Elektaroonigga ah

Macluumaad Loogu Talagalay Mulkiileyaasha Guryaha

Qashinka Guriga ee Khatarta Leh

Si looga hortago khataraha caafimaadka iyo deegaanka, waa in alaabooyinka guriga ee khatarta leh si haboon looga takhaluso haddii weelka ay ku jiraan uu waxyeeloobay oo walaxdu ay banaanka weelka uga soo baxayso. Raadi weel sii daynaya ama waxyeeloobay sida weelka:

- Mileyaasha.
- Rinjiga.
- Sunta cayayaanka.
- Bacrimiyeyaasha.
- Saliid.
- Nadiifiyeyaasha bulaacadda.
- Baytariyada ah asiidh-ledh (lead-acid).

Haddii aad haysatid alaabooyinka walwarka leh, qaad talaabooyinka soo socda:

- Ku rid weel kale oo ka sii ammaan badan, haddii ay suurogal tahay.
- Magac ku qor weelka.
- **Ha isku darin** kiimikooyin ama walxo. (Ha isku darin rinji ah “latex” iyo rinji ku saleysan saliid. Waxaad rinji ah “latex” ku dari kartaa rinji kale oo isna ah “latex” sidoo kalena rinji ku saleysan saliid waxa aad ku dari kartaa rinji kale oo isna ku saleysan saliid.)
- Waxyaabaha daatay ku nuug “xashiishka bisadda” ka dibna ku rid bac ama weel kale oo adag.
- Bacaha ama jawaanada ay ku jiraan kiimikooyinka beerta ee waxyeeloobay ama qoyan ku rid baco ama weel kale.
- Alaabooyinka qashinka ah ee guriga ee khatarta leh gee goob ururin loogu talagalay.

Alaabooyinka Elektaroonigga ah

Alaabooyinka elektaroonigga ah badanaa waxa ku jira macaadiin sida ledh, kaadmiam iyo koroomiyam kuwaasoo sumeyn kara biyaha iyo ciidda. Sidaa daraadeed, waa in elektaroonigga si haboon looga takhaluso.

- Goobta ururinta ee degmadaada weydii fariimaha u gaarka ah beeshaada.

Haddii aad qabtid wax su’aalo ah oo ku saabsan qashinka guriga, ka wac Waaxda Caafimaadka ee North Dakota teleefonka 701.328.5166.